| | |
|---|---|
| AQOONSI | PAS1A |
| Nooca Dukumeentiga | Siyaasad |
| Nooca Lagu dabaqi karo | UVMH CVMC/PMC/UVMMC |
| Ciwaanka Milkiilaha | AVP ee Helitaanka Bukaanka |
| Ciwaanka Mas'uulka Ansixiyay | Madaxa Furista Maaliyadda & CFO |
| Taariikhda Dhaqan-galka | 1/1/2026 |
| Taariikhda ee Dib-u-eegista Xigta | 1/1/2029 |

**CIWAANKA**: Barnaamijka Gargaarka Maaliyadeed – Isbitaalka Vermont

**UJEEDADA**: Si loo dejiyo siyaasad iyo habraac ku saabsan maamulka Barnaamijka Gargaarka Dhaqaale ee Isbitaallada Vermont ee University of Vermont Health.

**BAYAANKA SIYAASADEED:** University of Vermont Health ("UVMH") waa urur bukaan-ku-salaysan oo u heellan in si siman loola dhaqmo dhammaan bukaannada, iyadoo sharaf iyo karaamo la siinayo, xitaa haddii ay haystaan caymis caafimaad ama kheyraad dhaqaale iyo haddii kale. Sidoo kale, Isbitaallada Shabakadda Vermont ee UVMH (sida hoose lagu qeexay) waxay ku dadaalaan bixinta gargaar dhaqaale bukaannada leh baahiyo daryeel caafimaad oo muhiim ah, kuwa aan lahayn caymis caafimaad, kuwa caymiska yar, kuwa aan xaq ugu lahayn barnaamijyo dawladeed, ama kuwa kale ee aan awoodin inay bixiyaan kharashaadka daryeel caafimaad ee muhiimka u ah caafimaadkooda iyadoo lagu saleynayo xaaladdooda dhaqaale ee shakhsiga ah. Iyadoo la waafajinayo himiladeeda ah in la siiyo daryeel caafimaad oo naxariis leh, tayo leh, la awoodi karo, urur aan faa'iido doon ahayn ahna UVMH wuxuu ku dadaalayaa in awoodda dhaqaale ee dadka u baahan daryeel caafimaad aysan ka hor istaagin helitaanka ama qaadashada daryeel.

Gargaarka Dhaqaale looma tixgeliyo beddelka masuuliyadda shakhsiga ah. Bukaannada waxaa laga filayaa inay la shaqeeyaan Shuraakada Isbitaallada Vermont ee UVMH iyagoo raacaya habraacyada helitaanka hababka kale ee lacag-bixinta ama gargaar dhaqaale, iyo inay ka qayb qaataan kharashka daryeelkooda iyadoo lagu saleynayo awooddooda shakhsi ahaaneed ee bixinta. Dadka leh awood dhaqaale oo ay ku iibsan karaan caymis caafimaad ayaa lagu dhiirigelinayaa inay sidaas sameeyaan, si loo xaqiijiyo helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka, daryeelka caafimaadkooda guud, iyo ilaalinta hantidooda gaarka ah.

Si loo maamulo kheyraadka si masuuliyad leh loona oggolaado UVMH inay bixiso heerka ku habboon ee gargaarka dadka ugu badan ee u baahan, siyaasadaha iyo habraacyada soo socda ayaa loo dejiyey bixinta gargaarka maaliyadeed ee bukaannada.

Siyaasaddani waxay khusaysaa Isbitaallada Dadka Jiifa iyo Qaybaha Isbitaallada Dadka Bannaanka ee hoos yimaada Isbitaallada Wada-hawlgalayaasha Vermont ee UVMH ee soo socda:

| | | |
|---|---|---|
| Central Vermont Medical Center<br>130 Fisher Road<br>Berlin, VT 05602 | Porter Medical Center<br>115 Porter Drive<br>Middlebury, VT 05753 | The University of Vermont Medical Center<br>111 Colchester Avenue<br>Burlington, VT 05401 |

HABRAACYADA:

**Gargaarka Maaliyadeed**

**<u>U-qalmitaanka Adeegyada Daryeelka Caafimaadka</u>**:

Adeegyada soo socda ayaa u qalma gargaarka maaliyadeed:
- Adeegyada caafimaadka degdegga ah ee lagu bixiyo qolka degdegga ah ee isbitaalka iyo
- Adeegyada daryeelka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah, sida adeegyada degdegga ah ee xaalad haddii aan si degdeg ah loo daaweyn ay keeni lahayd isbeddel xun oo ku yimaada caafimaadka qofka.

Adeegyada aan u qalmin gargaarka maaliyadeed waxaa ka mid ah, laakiin kuma koobna:
- Adeegyada quruxda/jir-dhiska;
- Adeegyada dhalmo la'aanta/dhalmada (tusaale ahaan, IVF, vasectomy/soo celin, xiritaanka tubooyinka ugxanta/soo celin);

- Daryeel aan caafimaad ahaan lagama maarmaan ahayn, oo ay ku jiraan daryeelka ilaaliyaha marka aan loo baahnayn isbitaal degdeg ah;
- Adeegyada lagu daboolo siyaasad guud (tusaale ahaan, qiimo dhimis horey loo isticmaalay);
- Adeegyada cilmi-baarista/waayo-aragnimada;
- Daryeelka dadka aan muwaadiniinta Mareykanka ahayn ee ku sugan Mareykanka iyaga oo wata fiiso socdaal/booqasho; haddii aan (i) daryeelkaasi lagu siin qol degdeg ah; ama (ii) qofkaas aan Mareykanka u dhalan uu ku nool yahay ama ka shaqeynayo Vermont xilliga daryeelkaas;
- Adeegyada lagu bixiyo Appletree Bay; iyo
- Adeegyada si toos ah loogu magdhabay bukaanka bixiyaha caymiska ama dhinac saddexaad

**Daboolidda Dhakhaatiirta**: Dhakhaatiirta caafimaadka ee UVMH shaqaaleysiisay oo daryeel ka bixiya Isbitaallada Vermont ee UVMH iyo rugaha dhakhaatiirta ayaa lagu daboolayaa siyaasaddan. Liis casri ah oo dhakhaatiirta u qalma waxa laga heli karaa mareegta isbitaal kasta oo khuseeya, xiriiriyeyaasha waxa laga heli karaa qaybta macluumaadka xiriirka barnaamijka ee siyaasaddan. Si aad u codsato nuqul warqad ah oo liiska ah, bilaash, fadlan la xiriir Waaxda Adeegga Macaamiisha ee 802-847-8000 ama 800-639-2719.

**Daboolidda Isbitaalka**: Dhammaan adeegyada u qalma ee lagu bixiyo ama lagu amro Isbitaallada Vermont ee UVMH iyadoon loo eegin xaaladda shaqo ee dhakhaatiirta (haddii ay shaqaale yihiin ama aanay shaqaale ahayn). *Ogeysiis:* Qodobkan waxa uu khuseeyaa oo keliya biilasha isbitaalka/goobaha caafimaadka; eeg daboolidda dhakhtarka si loo go'aamiyo in biilka dhakhtarka la dabooli doono.

**U-qalmitaanka Maaliyadeed**: U-qalmitaanka gargaarka maaliyadeed waxaa loo tixgelin doonaa shakhsiyaadka aan lahayn caymis caafimaad, caymis kaliya qayb ahaan haya, aan u qalmin barnaamij kasta oo dawladeed oo daryeel caafimaad ah, ama aan awoodin inay bixiyaan kharashka daryeelkooda, iyadoo lagu salaynayo go'aaminta baahida maaliyadeed ee waafaqsan siyaasaddan. Bixinta gargaarka waxa lagu salayn doonaa go'aan shakhsiyeed oo ku saabsan baahida maaliyadeed waxaana lagu xidhnaan doonaa Shuruudaha Deganaanshaha ee hoos lagu qeexay, balse looma tixgelin doono da'da, jinsiga, midabka, jinsiga, jihada galmada, aqoonsiga jinsiga, xaaladda guurka, diinta, asal-raaca, dalka uu asal ahaan ka soo jeedo, dhalashada, xaaladda socdaalka, luqadda koowaad, naafanimada, xaaladda caafimaadka, ama macluumaadka hiddo-sideyaasha.

Marka laga reebo xaaladaha Faqriga Caafimaad ee Xun (sida hoos lagu qeexay), u-qalmitaanka gargaarka maaliyadeed waxa lagu salaynayaa imtixaanka dakhliga iyo imtixaanka hantida. Bukaan waxa uu u gudbi doonaa labada imtixaan si uu ugu qalmo gargaar maaliyadeed.

- Imtixaanka Dakhliga: Bukaan dakhligiisa qoyska oo lagu go'aamiyey si waafaqsan 18 V.S.A. § 9481(5), haddii uu yahay ama ka hooseeyo 400% Heerarka Saboolnimada Federaalka (FPLG) waa uu gudbi karaa imtixaanka dakhliga.

    - Kuwa ku tiirsan ee jira 18 sano ama ka weyn waxa lagu dari karaa tirada qoyska marka lagu qoro ku-tiirsane cashuur celinta Dakhliga Federaalka.
    - Shaqaalaha socdaalka ee xubnaha qoyskooda tooska ah (xaaska iyo carruurta dhalasho/koritaan) ay ku nool yihiin dalka dibaddiisa waxa lagu dari doonaa tirada qoyska.

- Imtixaanka Hantida: Qof kasta/qoys kasta waxaa loo oggol yahay hanti dareere ah oo u dhiganta heerarka dakhliga ee 400% FPL, iyadoo lagu saleeyo tirada qoyska. Haddii hantida dareeraha ahi ay ka hooseyso tilmaantan, bukaanku waxa uu gudbayaa imtixaanka hantida.

    - Hantida dareeraha ahi waa hantida lagu beddeli karo lacag caddaan ah iyada oo aan la kulmin ganaaxyo culus, waxaana ka mid ah, laakiin aan ku koobnayn: akoonnada hubinta, kaydka, ama akoonnada suuqa lacagta; akoonnada maalgashi ee aan sharciga waafaqsanayn;
    - Hantida dareeraha ahi si gaar ah uguma jiraan guriga ugu weyn ee qoyska, akoonnada hawlgabka ee u qalma (tusaale, 401(k), IRA, iwm), qorshayaasha hawlgabka, iyo akoonnada kaydka 529, maal guriyeed oo darajo labaad ah iyo dhul. Hantidaas looma tixgelin doono ujeedada lagu go'aaminayo xaqa loo leeyahay gargaarka maaliyadeed.

- Faqri Caafimaad oo Xun: Bukaanada dakhligooda qoyska oo lagu go'aamiyey si waafaqsan 18 V.S.A. § 9481(5), haddii uu yahay ama ka hooseeyo 600% FPLG, isla markaana biil isbitaalka oo uu si toos ah u bixiyo uu dhaafo 20% dakhliga

qoyska; markaas UVMH waxay ka dhimi doontaa lacagta uu bixinayo bukaanku ilaa 20% dakhliga qoyska ama $10,000, iyadoo la qaadanayo kan yar.

**<u>Shuruudaha Deganaanshaha</u>**: Bukaanadu waa inay degganaadaan gudaha aagga adeegga UVMH marka laga reebo haddii adeegyada caafimaadku ahaayeen kuwo degdeg ah ama xaalad degdeg ah. Adeegyada jadwalka leh ee loogu talagalay bukaanada deggan meel ka baxsan aagga adeegga UVMH kama istaahilan karaan gargaarka maaliyadeed. Gargaarka maaliyadeed ee dadka deggan meel ka baxsan aagga adeegga UVMH waxa la siin doonaa oo keliya xaalado gaar ah iyo oggolaansho ku habboon.

Aagga adeegga UVMH waxaa lagu qeexay: dhammaan degmooyinka Vermont, degmooyin la xushay oo ku yaalla New York (Clinton, Essex, Franklin, Washington, Hamilton, Warren, iyo St. Lawrence) iyo degmooyin la xushay oo ku yaalla New Hampshire ee shaybaarka tixraaca (Coos, Grafton, iyo Sullivan Counties).

- Dadka deggan Vermont waxay ku nool yihiin Vermont, waxayna u shaqeeyaan loo-shaqeeye Vermont ah si ay ugu keenaan adeegyo gudaha Vermont, ama waxay dhigtaan iskuul ku yaalla Vermont, ama labadaba. Eraygani waxa uu ku jiraa qof ku nool Vermont xilliga adeegyada la bixiyo balse aan haysan guri joogto ah oo deggan.
- Dadka deggan New York waa inay ku noolaadaan aagga adeeggeena in ka badan 6 bilood sanadkii si ay u buuxiyaan shuruudda deganaanshaha.

Caddeynta deganaanshaha waxaa lagu muujin karaa mid ka mid ah kuwa soo socda:

- Cashuur celinta dakhliga federaalka ee ugu dambeysay oo muujinaysa cinwaan aagga adeegga;
- Shatiga wadista ee aagga adeegga, biilasha guryaha oo wata cinwaanka aagga adeegga, heshiiska kiro guri ee aagga adeegga ama biilka adeegyada guud ee aagga adeegga, nuqulka qandaraaska shaqaalaha socdaalka ama warqadda qandaraaska shaqo ee uu bixiyay loo-shaqeeyaha;
- Warqadaha mushaharka shaqada ee Vermont, caddeynta diiwaangelinta dugsiga, ama qoraal rasmi ah oo ka yimid Rugta Caafimaadka Open-Door (Open Door Clinic); ama
- Qoraal iyo saxiix ka yimid bukaanka (ama waalidka/mas'uulka daryeelka, sida ay noqon karto) oo muujinaya in bukaanku uu ku noolaa Vermont balse uusan haysan hoy joogto ah xilligii adeegyada la bixinayey.

**<u>Caymiska Caafimaadka iyo Lacagaha Mas'uuliyadda</u>**: Adeegyada lagu bixiyo UVMH Vermont Hospital Partner waxaa loo diri doonaa caymiska koowaad ee bukaanka, caymiscaafimaadoo gaar ah, qorshaha caafimaadka shaqadaeeloo-shaqeeyaha, magdhowga shaqaalaha, ama waxaa loo gudbin doonaa shirkadaha caymiska mas'uuliyadda saddexaad. Haddii ay jiraan lacag-bixinno la xiriira shil gaari/ dhaawac oo suuragal ah mustaqbalka, UVMH waxay qabsan doontaa xuquuq (lien) si loo ilaaliyo danaha dhaqaale, marka laga reebo dadka hela Medicare/Medicaid. Marka xuquuqdaas la qabsado, gargaar maaliyadeed waa la bixin karaa haddii bukaanku uu buuxiyo shuruudaha kale. Haddii mustaqbalka la bixiyo lacagaha mas'uuliyadda, xuquuqda UVMH waxay u oggolaan doontaa inay dib u hesho qayb ka mid ah ama dhammaan gargaarka maaliyadeed ee hore loogu qoondeeyey bukaanka.

**<u>Barnaamijyada Caafimaadka Dadweynaha / Shuruudaha Is-weydaarsiga Daryeelka Caafimaadka</u>**: Bukaanada codsanaya barnaamijka gargaarka maaliyadeed ee UVMH Vermont Hospital Partner waxaa dib loogu eegi doonaa xaq u yeelashadooda barnaamijyada daryeelka caafimaadka ee gobolka ama federaalka, waxaana lagu dhiirigelin doonaa inay iska diiwaangeliyaan caymis caafimaad. Marka laga reebo muhaajiriinta aan sharciyeysneyn, bukaannada loo aqoonsaday musharrixiin u qalmi kara Medicare ama Medicaid, codsi iyo u hoggaansanaanta xeerarka barnaamijyadaas waa shardi hordhac ah oo loogu talagalay barnaamijka gargaarka maaliyadeed ee UVMH.

Ka-reebitaannada:

- Bukaanada hoos yimaada ka-reebitaannada ACT119 lagama dhimi doono qiimahooda taas ku saleysan
- Dadka degan Vermont ee u qalma Medicaid waxaa laga doonayaa inay raadsadaan caymis kaliya haddii dakhligooda uu ka hooseeyo heerarka ugu badan ee Medicaid.
- Diidmada muhaajir aan sharciyeysneyn ee ku saabsan inuu codsado barnaamijyo dadweyne laguma saleyn doono in loo diido gargaarka maaliyadeed.
- Diidmada dadka deggan Vermont ee ku saabsan inay iibsadaan caymis caafimaad gaar loo leeyahay ama mid lagu beddelo suuqa looguma arki doono sabab loo diido gargaarka maaliyadeed.
- Bukaanada ay diidaan caqiidadooda diimeed ama aragtidooda dhaqameed inay ka raadsadaan ama ka helaan gargaar maaliyadeed hay'ad dowladeed waxaa laga saari karaa xeerka barnaamijka daryeelka caafimaadka dadweynaha. Si

kastaba ha ahaatee, bukaanka waxaa laga doonayaa inuu qaado qayb ka mid ah mas'uuliyadda maaliyadeed, taas oo ay qiimeyn doonaan Guddiga Racfaanka Barnaamijka Gargaarka Maaliyadeed iyo Madaxa Maaliyadda (CFO).

**Go'aaminta Baahida Maaliyadeed**: Baahida maaliyadeed waxaa lagu go'aamin doonaa iyadoo la raacayo habraacyo ay ku jirto qiimeyn shaqsiyeed taas oo ka koobnaan doonta kuwan soo socda:

- Geeddi-socodka codsiga, kaas oo bukaanka ama damiinka bukaanka looga baahan yahay inuu la shaqeeyo oo bixiyo xog shakhsiyeed, maaliyadeed iyo macluumaad kale oo khuseeya, iyo dukumeentiyo la xiriira si loo sameeyo go'aaminta baahida maaliyadeed;
- Dib u eegis lagu sameeyo ilo xogeed dadweyne oo si furan loo heli karo kuwaas oo bixiya macluumaad ku saabsan awoodda bixinta ee bukaanka ama damiinka bukaanka;
- Dadaallo macquul ah oo ay UVMH ku baari doonto ilo kale oo ku habboon oo lacag-bixin ah iyo caymis laga helo barnaamijyada lacag-bixinta ee dadweynaha iyo kuwa gaarka ah, iyo, halka ay khuseyso, inay caawiyaan bukaanka si ay ugu codsadaan barnaamijyadan;
- Tixgelinta hantida dareeraha ah ee bukaanka la heli karo, iyo dhammaan kheyraadka kale ee maaliyadeed ee uu heli karo bukaanka; iyo
- Dib u eegista akoonnada haraaga ah ee bukaanka ee UVMH ee khuseeya adeegyada hore ee la bixiyay ee u qalma.

Xaaladaha Gargaarka Maaliyadeed ee Lagu Qiyaaso (Presumptive Financial Assistance), sida hoos lagu sharraxay, habka codsiga waxaa lagu beddeli karaa go'aanka UVMH.

Waxaa la doorbidayaa, inkasta oo aan waajib ahayn, in codsiga gargaarka maaliyadeed iyo go'aaminta baahida maaliyadeed la sameeyo ka hor inta aan adeegyada la bixinin. Bukaan kasta waa inuu yeesho haraaga akoon bukaaneed oo hadda taagan oo ay ku leedahay UVMH Vermont Hospital Partner, filashada ah in akoon caymis sugaya uu ka tagi doono haraag taas oo ku saabsan UVMH Vermont Hospital Partner, ama adeeg mustaqbal ah oo lagu qorsheeyay/lagu gudbiyay UVMH Vermont Hospital Partner oo la filayo inuu ka tago haraaga bukaaneed.

**U-qalmitaanka Gargaarka Maaliyadeed ee Lagu Qiyaaso**: Waxaa jira xaalado marka bukaan uu u muuqan karo inuu u qalmo gargaar, hase yeeshee, aan jirin codsi gargaar maaliyadeed oo faylka ku jira sababo la xiriira dukumeenti taageero ah oo maqan. Badanaa waxaa jira xog ku filan oo uu bixiyo bukaanka ama laga helo ilo kale oo laga yaabo inay bixiyaan caddeyn ku filan oo lagu siiyo bukaanka gargaarka maaliyadeed.

U-qalmitaanka lagu qiyaaso waxaa lagu go'aamin karaa iyadoo lagu saleynayo duruufo nololeed shaqsiga oo ay ka mid noqon karaan:

- U-qalmitaanka barnaamijyada kale ee dawliga ama kuwa maxalliga ah ee aan maalgelin (tusaale, Medicaid)
- U-qalmitaanka Barnaamijka Caawinta Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP)
- Ka-qaybgalka barnaamijyada Dumarka, Dhallaanka iyo Carruurta (WIC)
- Bukaan ku jira xabsi/jeel oo leh haraaga aan caymis daboolin
- Bukaan hoy la'aan ah

Xaq u lahaanshaha horudhaca ah waxaa lagu hagaajin doonaa koodh lacag-bixin/ macaamil gaar ah si loo hubiyo in doolarkan laga reebo Warbixinta Kharashka Medicare.

**Muddada Codsiga**: UVMH waxa ay ka shaqayn doontaa dhammaan codsiyada dhammaystiran ee uu soo gudbiyo qof kasta wakhti kasta inta lagu jiro habka ururinta.

**Waqtiga Habaynta Codsiga**: 30 maalmood oo kalandarka gudahood marka la helo codsi gargaar maaliyadeed, UVMH waxa ay qoraal ahaan ugu soo wargelin doontaa bukaanka in codsiga la ansixiyay ama la diiday, ama haddii codsigu aanu dhammaystirnayn, macluumaadka loo baahan yahay si loo dhamaystiro codsiga. Macluumaad dheeraad ah, haddii la codsado, waa in lagu soo celiyaa 30 maalmood gudahood codsiga kadib, haddii kale codsiga waa la xiri doonaa sabab la xiriirta u hoggaansanaan la'aan. Haddii UVMH ay diido codsiga bukaanka, markaas ogeysiiska qoraalka ahi waxa uu ka koobnaan doonaa sababaha xaqiiqda ku saleysan ee diidmada. Haddii UVMH ay ansixiso codsiga gargaar maaliyadeed, UVMH waxay siin doontaa bukaanka xisaabinta gargaarka maaliyadeed ee la siiyay iyo biil dib loo saxay.

Haddii UVMH ay diido codsiga gargaar maaliyadeed, bukaanku waxa uu gudbin karaa rafcaan 60 maalmood gudahood kadib marka uu helo go'aanka UVMH. UVMH waxay bukaanka ku wargelin doontaa ansixinta ama diidmada rafcaanka bukaanka 60 maalmood gudahood kadib marka la helo rafcaanka.

**Muddada Xaq-u-yeelashada Gargaarka Maaliyadeed**: Baahida gargaarka maaliyadeed waa in dib loo qiimeeyaa markasta oo adeeg la bixiyo haddii qiimeyntii maaliyadeed ee ugu dambeysay la sameeyay wax ka badan lix bilood ka hor, ama mar kasta oo macluumaad dheeraad ah oo khuseeya xaq u yeelashada bukaanka gargaar la ogaado. Dib-u-qiimeynta bukaannada naafo ah ama da'doodu dhaaftay 64 oo dakhliga joogtada ahi ka hooseeyo 400% FPLG waa in la sameeyaa sannad kasta. Dib-u-qiimeynta shaqaalaha joogtada ah iyo kuwa waqti-buuxa ee UVMH ee dakhliga ka hooseeyo 400% FPLG waa in la sameeyaa sannad kasta. Mas'uuliyadda ayaa saaran bukaanka in uu UVMH ku wargeliyo isbeddellada dhaqaale ee muddada abaalmarintiisa.

**Hagayaasha Gargaarka Maaliyadeed**: Qadarka gargaarka la siiyo bukaanka xaqa u leh waxa uu ku kala duwanaan doonaa heerka dakhligooda. Bukaannada xaqa u leh ee aan caymis lahayn, qadarka gargaarka waxa lagu salayn doonaa qiimo-dhimis laga jaray qadarka guud ee caadiga ah ee loo qoro ("AGB") adeegyada la helay. Bukaannada xaqa u leh ee leh caymis, qadarka gargaarka waxa lagu salayn doonaa qiimo-dhimis lagu sameeyo kharashaadka jeebka bukaanka. Waligood ma lagu dallaci doono bukaanka xaqa u leh lacag ka badan AGB adeegyada caafimaad ee degdegga ah ama kuwa kale ee daruuriga ah, ka dib marka laga jaro dhammaan qiimo dhimisyo (oo ay ku jiraan qiimo dhimisyada hoos ku xusan siyaasaddan), iyo lacag celinta caymiska.

Lacagta guud ahaan la dallaco, ama AGB, waxa ay ka dhigan tahay lacagta guud ee UVMH si joogto ah ugu dallaco dadka leh caymiska adeegyada caafimaad ee la midka ah, taas oo lagu go'aamiyo iyadoo la adeegsanayo "habka dib-u-eegista" ee lagu qeexay 26 C.F.R. § 1.501(r)-5(b)(3). Waxaad ka heli kartaa nuqulka xisaabinta iyo boqolkiiba AGB, kaas oo la cusbooneysiiya sanad walba, qoraal ahaan oo bilaash ah adiga oo booqanaya mareegteena ama wacaya waaxda adeegga macaamiisha. Mareegta iyo tilmaamaha lambarrada telefoonka waxaa lagu soo bandhigay qaybta macluumaadka xiriirka barnaamijka ee siyaasaddan.

**Abaalmarinta Gargaarka**:

- Bukaannada xaqa u leh waxay heli doonaan daryeel bilaash ah (100% qiimo dhimis saami is-bixinta) marka dakhliga guud ee qoyska ee la hagaajiyay uu yahay ama ka hooseeyo 250% heerka saboolnimada federaalka (FPLG).
- Bukaannada xaqa u leh ee aan caymis lahayn ee leh dakhli guud oo qoyska la hagaajiyay oo u dhexeeya 250% iyo 400% ee FPLG waxa ay heli doonaan qiimo dhimis dheeraad ah oo ah 40% oo laga jaro lacagta guud ahaan lagu dallaco adeegyada la helay.
- Bukaanada xaqa u leh ee leh caymis ama caymis kale oo daboolaya adeegyada la bixiyey oo leh dakhliga qoyska oo u dhexeeya 250% iyo 400% ee FPLG waxa ay heli doonaan 40% qiimo dhimis dheeraad ah kharashaadka jeebka ee bukaanka, ka dib marka la bixiyo lacagaha caymiska ama lacagaha kale ee daboolka.

**Ansixinta Habraaca Codsiga**: Marka codsiga la ansixiyo, abaalmarinta bukaanka waxa lagu dabaqayaa dhammaan deynta furan (sida, isbitaalka iyo dhakhtarka, lacagaha guud ee bukaanka aan caymiska lahayn iyo haraaga ka dib caymiska bukaanka leh caymis) waxaana lagu fidinayaa daaqad dabool ah oo lix bilood ah ama 12 bilood ah, sida kor lagu xusay, halkaas oo dakhliga lagu hagaajiyey gudaha sannadka kalandarka. Daaqadda daboolka waxa ay bilaabataa taariikhda ansixinta waxaana ay socotaa ilaa maalinta ugu dambaysa ee bisha uu abaalmarintu dhaco. Marka muddada abaalmarintu dhamaato, bukaanku waxa laga rabaa in ay mar kale codsadaan gargaar maaliyadeed, waxaana ku saleysan xaaladooda dhaqaale, laga yaabaa in la beddelo qaybta abaalmarintooda.

**Lacag Celin**: Haddii bukaanku gudbiyo codsi gargaar maaliyadeed oo dhammaystiran oo la go'aamiyo in uu xaq u leeyahay gargaar maaliyadeed, markaa UVMH waxa uu soo celin doonaa wixii lacag dheeraad ah ee bukaanku bixiyay daryeelkooda gudahood 240 maalmood ee ka horreeya helitaanka codsiga dhammaystiran. Lacagaha lagu bixiyo ka baxsan muddada 240-ka maalmood ee codsiga laguma heli doono lacag celin.

**Racfaannada/Kormeerka Kiisaska Shaqsiga**: UVMH waxa uu aqoonsan yahay in ay jiri karaan duruufo adag oo dheeraad ah halkaas oo dakhliga qofku ka badin karo shuruudaha xaq u yeelashada barnaamijka ama halka dhibaatadu weli ku sii jirto abaalmarinta la ansixiyey. Bukaanadu waxay haystaan 60 maalmood laga bilaabo marka ay helaan go'aanka gargaar maaliyadeed ee qoran si ay rafcaan uga qaataan go'aanka. UVMH waxa uu bukaanka ku wargelin doonaa ugu dambayn 60 maalmood gudahood ka dib marka la helo rafcaanka, haddii la oggolaaday ama la diiday.

Guddiga racfaannada oo ka kooban xirfadlayaal badan ayaa la isugu yeeri doonaa si ay u eegaan rafcaannada, iyo sidoo kale kiisaska masiibooyinka ama xaaladaha aan caadiga ahayn ee aan la kulmin shuruudaha barnaamijka balse keenaya dhibaato aan caadi ahayn. Guddigu waxa uu dib u eegi doonaa kiisaska wuxuuna siin doonaa talo soo jeedin CFO-ga. CFO-ga waa go'aamiyaha ugu dambeeya.

Marka baahida caafimaad aysan caddayn, kiisaska waxa loo gudbin doonaa Madaxa Caafimaadka (Chief Medical Officer) ama qof ay magacaabeen si uu go'aan uga gaaro baahida caafimaad ee adeegyada la bixiyey. Haddii adeegyada loo arko kuwo caafimaad ahaan lagama maarmaan ah oo bukaanku buuxiyo shuruudaha xaq u yeelashada gargaarka maaliyadeed, gargaar ayaa la siin doonaa.

**Muddada Ogeysiiska**: UVMH waxa uu dadaal macquul ah ku bixin doonaa sidii uu bukaannada ugu wargelin lahaa barnaamijka gargaarka maaliyadeed. Muddadani waxay bilaabmaysaa marka la soo saaro biilka bukaanka ee adeegyada daryeelka, waxayna dhammaanaysaa 180 maalmood ka dib. Sida ku qeexan siyaasaddan, habab badan oo ogeysiis ah ayaa dhici kara kahor adeegga, inta lagu jiro adeegga iyo muddada 180-ka maalmood ee wareegga biilka.

Haddii dhamaadka muddada ogeysiiska ee 180-ka maalmood xisaab lagu wareejiyo hay'adda ururinta, laakiin codsi la soo gudbiyo oo la ansixiyo, xisaabaadkaas waa in dib looga soo celiyaa hay'adda oo lagu shaqeeyaa barnaamijka gargaarka maaliyadeed.

**Codsiyada iyo Warqadaha Abaalmarinta**: Iyadoo la waafajinayo xeerarka ACT119, xogaha soo socda ayaa lagu muujin doonaa dukumeentiyada qoraalka ah ee la siiyo bukaannada.

- Codsiyada aan dhammaystirnayn, warqadaha waxaa lagu wargelin doonaa bukaanka macluumaadka looga baahan yahay si loo dhammaystiro codsiga
- Ansixinta waxa ay ku jiri doontaa qadarka gargaarka, saldhigga loo adeegsaday xisaabinta lacagta lagu leeyahay, iyo biil cusub oo la cusboonaysiiyey oo muujinaya haraaga wareegga biilka xiga, iyadoo loo marayo qorshayaasha miisaaniyadda oo aan dhaafin shan boqolkiiba dakhliga bil kasta ee bukaanka.
- Diidmada waxa lagu dari doonaa sababaha diidmada iyo macluumaadka ku saabsan sida loo racfaan qaato go'aanka

**Dadaalo Macquul ah**: Dadaalo macquul ah ayaa la sameyn doonaa si loo go'aamiyo in bukaanku u qalmo gargaar maaliyadeed kahor inta aan haraaga loo wareejin ururinta. Dadaallada macquulka ah waxa ku jiri kara isticmaalka qiimeyn hore, ogeysiinta iyo habaynta codsiyada iyo ogeysiiska kahor,intalagujiro iyo kadib daryeelka.

- UVMH ma bilaabi doono wax tallaabooyin ururin gaar ah (ECA)
- Codsiyada aan dhammaystirnayn waxa la habayn doonaa iyadoo la siinayo bukaannada tilmaamo ku saabsan sida ugu habboon ee loo dhammaystiro codsiga iyo/ama waxa dukumeenti dheeraad ah loo baahan yahay, waxaana la siin doonaa muddo 30 maalmood ah oo ay kaga jawaabaan codsiga UVMH
- UVMH waxa uu habayn doonaa codsiyada dhammaystiran 30 maalmood gudahood laga bilaabo marka la helo

**La-hawlgalayaasha University of Vermont Health**: Bukaanku waxa ay gudbin karaan hal codsi oo gargaar ah mid ka mid ah La-hawlgalayaasha UVMH ee Vermont ee lagu xusay siyaasaddan. Iyadoo ku xiran kala duwanaanshaha sharciga gobolka, codsiyo kala duwan ayaa loo baahan karaa La-hawlgalayaasha UVMH ee New York. La-hawlgalaha kasta waxa uu siin doonaa gargaar heerka FPLG ee ku habboon oo loogu talagalay hay'adda gaarka ah, iyadoo lagu saleynayo xisaabinta gaarka ah ee AGB ee hay'adda. Dukumeentiyada taageerada waxa uu sii hayn doonaa hay'adda farsameyneysa codsiga, hase yeeshee waxaa la siin doonaa ururka La-hawlgalaha si loogu fududeeyo hawlaha kormeerka.

**Isgaarsiinta Barnaamijka Gargaarka Maaliyadeed ee Bukaannada iyo Bulshada**: Ogeysiiska ku saabsan gargaarka maaliyadeed waxa laga heli karaa UVMH, kaas oo ku jiri doona lambarka xiriirka, waxaana UVMH ku faafin doontaa siyaabo kala duwan, oo ay ka mid yihiin, laakiin aan ku ekeyn:

- Xuska barnaamijka gargaarka maaliyadeed oo lagu daabacay bayaanka bukaan kasta.
- Ku dhejinta ogeysiisyada qolalka gargaarka degdegga ah, waaxyaha qiridda iyo diiwaangelinta, iyo xafiisyada adeegyada maaliyadeed ee bukaanka ee ku yaal goobaha xarumaha; meelo muuqda oo dadku arki karaan ayaa laga heli karaa waaxyaha diiwaangelinta iyo gargaarka degdegga ah.
- Bixinta nuqul kooban oo luuqad sahlan ah oo ka mid ah siyaasadda goobta diiwaangelinta xarunta iyo ka dhigista kooban in laga helo rugahayaga caafimaad ee ka baxsan xarunta. Bixinta nuqulada siyaasadda iyo codsiga marka la codsado.
- Bukaannada ku jira isbitaalka, kuwa kormeerka ku jira, iyo bukaannada muddo gaaban la seexiyo, waxa la siin doonaa nuqul ka mid ah hagaha bukaanka isbitaalka, kaas oo ku jira macluumaad ku saabsan barnaamijka gargaarka maaliyadeed.
- Macluumaadka waxa laga heli doonaa mareegta UVMH, oo ay ku jiraan siyaasadda, sharaxaad kooban oo af fudud ah, codsiga, FAQ, hagayaasha FPLG, iyo macluumaadka xiriirka ee gargaarka daba-galka ah.

- Gudbinta bukaannada u baahan gargaar maaliyadeed waxaa samayn kara xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha UVMH ama shaqaalaha caafimaadka, oo ay ku jiraan dhakhaatiirta, kalkaaliyayaasha, la-taliyayaasha maaliyadeed, shaqaalaha bulshada, maareeyayaasha kiisaska, wadaaddada, iyo kafaala-qaadayaasha diinta. Codsi gargaar maaliyadeed waxaa samayn kara bukaanka ama xubin qoys, saaxiib dhow, ama qof la shaqeeya bukaanka, iyadoo lagu xisaabtamayo sharciyada khuseeya arrimaha qarsoodiga ah.
- Turjumaadaha loogu talagalay shakhsiyaadka leh xaddidaad ku saabsan fahamka af Ingiriisiga waxa la siin doonaa bulshooyinka ka kooban in ka badan 1,000 qof ama 5% bulshada degaanka adeegga. Sidoo kale, turjumaadaha loogu talagalay UVMH Vermont Partners waxa ku jiri doona 14-ka af ee ugu sarreeya ee lagu aqoonsaday warbixinta 2023 ee Xafiiska Sinaanta Jinsiyadaha ee Vermont (Vermont Office of Racial Equity 2023 Language Access Report). Turjumaadaha qoraalka ah waxa laga heli karaa mareegta guud ee dadweynaha ama marka la codsado goob kasta oo diiwaangelin ah. Turjumaadaha afka ah waxa laga heli karaa iyada oo lala soo xiriiro Waaxda Adeegga Macaamiisha iyo/ama la kulanka lataliyaha maaliyadeed ee ku sugan xarunteena ugu weyn ee isbitaalka. Macluumaadka xiriirka ayaa hoos lagu muujiyey.
- Bukaanada u baahan nuqul turjuman iyo/ama gargaar ku saabsan buuxinta codsiga waxaa ka caawin doona lataliyayaasha maaliyadeed iyo/ama wakiillada adeegga macaamiisha, kuwaas oo xaqiijin doona adeegga turjubaan ku habboon.
- Macluumaadka, kaarar yaryar iyo waraaqo wacyigelin ah waxa laga heli karaa xafiiska Horumarinta Caafimaadka Bulshada, halkaas oo shaqaalaha si joogto ah ula falgalaan xarumaha bulshada iyo lataliyayaasha gudbiya macluumaadka iyo barnaamijyada loo heli karo dadweynaha.
- Siyaasadaha, codsiyada, liisaska dhakhaatiirta, iyo nuqul sharaxaad af fudud ah ayaa si bilaash ah loogu heli karaa khadka tooska ah, ama qof ahaan, goobaha xiriirka ee hoose lagu muujiyey.

**<u>Sida Loo Codsado Gargaarka Maaliyadeed</u>**: Bukaannada raadinaya gargaar maaliyadeed waa inay buuxiyaan oo gudbiyaan foomka codsiga, iyagoo ku daraya dhammaan dukumentiyada loo baahan yahay. Codsiyadu waa inay ku jiraan saxiixa codsadaha ama saxiixa wakiil matalaya codsadaha (tusaale, awood wakiil). Saxiixa waxa uu xaqiijinayaa saxnaanta xogta la soo gudbiyey, iyo sidoo kale xaqiijinta in dakhliga hadda jira uu weli sax yahay sida lagu muujiyey foomamka cashuur celinta dakhliga federaalka. U dir codsigaaga dhammaystiran, adigoo ku daraya dukumentiyada taageeraya, cinwaanka soo socda:

UVMH Patient Access Department
40 IDX Drive, Bldg. 200-22052
111 Colchester Avenue, Burlington, VT 05401

**<u>Soo Koobidda Xogta Xiriirka Barnaamijka</u>**: Siyaasadaha, codsiyada, liisaska dhakhaatiirta, nuqulada sharaxaadda af fudud, iyo gargaar fool ka fool ah ayaa si bilaash ah loogu heli karaa lana heli karaa iyada oo loo marayo:

- The University of Vermont Medical Center
    - Bogga internetka: http://UVMHealth.org/medcenter
    - Adeegga Macaamiisha: (802) 847-8000 ama (800) 639-2719
    - La-talinta Maaliyadeed: (802) 847-1122 ama gargaar fool-ka-fool ah, UVMMC, 111 Colchester Avenue, Burlington, VT 05401
    - Barnaamijka Gargaarka Caafimaadka: (802) 847-6984 ama wicitaan bilaash ah (888) 739-5183
    - Fakis: (802) 847-9332
    - Miisaska diiwaangelinta ee dhammaan goobaha
    - Daboolidda liiska bixiyeyaasha adeegga: https://www.UVMHealth.org/medcenter/patients-and-visitors/billing-insurance-and-registration/financial-assistance
- Porter Medical Center:
    - Mareegta: http://www.portermedical.org
    - Adeegga Macaamiisha: (802) 847-8000 ama (800) 639-2719
    - Bukaannada waxay wici karaan (802) 388-8808 ikhtiyaarka 5, Isniinta ilaa Jimcaha, 7:30 subaxnimo – 4:00 galabnimo
    - La-talinta Maaliyadeed ee 23 Pond Lane, Middlebury VT 05753
    - Miisaska diiwaangelinta ee dhammaan goobaha
    - Daboolidda liiska bixiyeyaasha adeegga: http://www.portermedical.org
- Central Vermont Medical Center:
    - Adeegga Macaamiisha: (802) 847-8000 ama (800) 639-2719 ama (802) 371-4600 ikhtiyaarka 1, ikhtiyaarka 1
    - La-talinta Maaliyadeed: 3 Home Farm Way, Montpelier, VT 05602

- Mareegta: https://www.cvmc.org/patients-visitors/patient-financial-services/financial-assistance
- Miisaska diiwaangelinta ee dhammaan goobaha
- Daboolidda liiska bixiyeyaasha adeegga: https://www.cvmc.org/patients-visitors/patient-financial-services/financial-assistance

**Xiriirka Siyaasadaha Ururinta**: Maamulka UVMH waxa uu dejin doonaa siyaasado iyo habraacyo ku saabsan hababka ururinta gudaha iyo dibadda kuwaas oo tixgelinaya inta uu bukaanku xaq ugu leeyahay gargaar dhaqaale, dadaalka daacadnimada leh ee bukaanka si uu ugu codsado barnaamij dawladeed ama gargaar dhaqaale oo ka socda UVMH, iyo dadaalka daacadnimada leh ee bukaanka si uu ugu hoggaansamo heshiisyada lacag-bixinta ee uu la leeyahay UVMH. Bukaannada u qalma gargaar dhaqaale oo wada shaqeyn daacad ah kula jira UVMH si ay u xalliyaan biilashooda isbitaalka, UVMH waxa ay u fidin kartaa qorshayaal lacag-bixin oo dheeraad ah.

Ogeysiis: UVMH ma bilaabi doonto wax tallaabooyin ururin gaar ah (ECA). ECA waxaa lagu qeexaa iibinta deymaha qofka oo loo gudbiyo cid kale, gudbinta xogta xun ee qofka hay'adaha ama xafiisyada warbixinta deymaha macaamiisha, dib-u-dhigidda, diidmada ama ku qasbidda bixinta ka hor inta aan la siin daryeel caafimaad oo lagama maarmaan ah sababtoo ah bixinta oo aan la helin hal ama dhowr biil oo daryeel hore loo bixiyey, iyo/ama tallaabooyin qaarkood oo u baahan geeddi-socod sharci ama maxkamadeed, sida lagu qeexay FAP. Nuqul ka mid ah siyaasadda Deymaha iyo Ururinta ee UVMH waxa laga heli karaa adiga oo la xidhiidhaya Waaxda Adeegga Macaamiisha lambarrada (802) 847-8000 ama (800) 639-2719. Nuqul sidoo kale waxa laga heli karaa goob kasta oo diiwaangelin ah ee UVMH.

**Sirta/Xafididda Dukumentiyada**: Dhammaan macluumaadka la xiriira codsiyada gargaar dhaqaale waa in lagu hayaa si qarsoodi ah. Codsiyada gargaarka dhaqaale iyo dukumentiyada taageerada ah waa in la hayo muddo toddobo sano ah laga bilaabo taariikhda oggolaanshaha ama diidmada si loo oggolaado in dib loo soo celiyo oo dib loo eego lana baaro.

**Heerarka Awoodda Wax-ka-beddelka Gargaarka Dhaqaale**: Heerarkan oggolaanshaha ah ayaa la raaci doonaa ka hor inta aan kharashyada laga saarin akoonka bukaanka shakhsiyeed ee ku jira Barnaamijka Gargaarka Dhaqaale ee Bukaanka:

| | |
|---|---|
| $1 - $20,000 | Khabiirka Barnaamijka Gargaarka Dhaqaale |
| $20,001 – $50,000 | Maareeye |
| $50,001 - $ 150,000 | Agaasime/AVP |
| >$150,001 | CFO |
| Racfaannada Guddiga | CFO |

**Shuruudaha Sharciyeed**: Marka la hirgelinayo siyaasaddan, maamulka iyo xarumaha UVMH waa inay u hoggaansamaan dhammaan sharciyada federaalka, gobollada, iyo kuwa deegaanka, iyo sidoo kale xeerarka iyo nidaamyada khuseeya hawlaha la fuliyo iyada oo la raacayo siyaasaddan.

**Xafididda Dukumentiyada**: Codsiyada dhammaystiran ee Barnaamijka Gargaarka Dhaqaale waa in la iskaanno laguna hayo diiwaanka caafimaadka elektarooniga ah muddo ugu yaraan toddobo sano ah ka dib taariikhda codsiga la oggolaaday ama la diiday.

**Qorshaha Kormeerka**: U hoggaansanaanta siyaasaddan waxaa lagu kormeerayaa dib u eegista sannadlaha ah ee codsiyada Barnaamijka Gargaarka Dhaqaale iyo go'aannada oggolaanshaha/diidmada. Kormeerro saddex-biloodle ah oo waaxuhu sameeyaan ayaa dhici doona, waxaana la dib u eegi doonaa warbixinaha natiijooyinka bil kasta.

**Qeexitaanno**: Ujeeddada siyaasaddan awgeed, erayada soo socda waxaa loo qeexayaa sidan:

- **AGB**: Qadarka guud ahaan loo xisaabiyo bixiyeyaasha caymiska adeegyada la bixiyay.
- **Deyn Xun**: Kharashaadka ku dhacay bukaan, oo iyadoo lagu saleynayo xogta dhaqaale ee la heli karo, uu u muuqdo inuu haysto awood dhaqaale oo uu ku bixiyo adeegyada caafimaadka ee lagu soo dalacay, laakiin ficilladiisa ay muujinayaan inuu diidan yahay xallinta biilka.
- **Faqri Caafimaad oo Xun/Daran**: Waxaa jira xaalado ay shakhsiyaad ahaan dhaqaale ahaan u awoodi waayaan inay helaan daryeel caafimaad oo ku filan iyaga oo aan ka qaadin naftooda iyo qoysaskooda cunto, dhar, hoy iyo waxyaabaha kale ee nolosha aasaasiga ah. Bukaan ayaa guud ahaan loo tixgelin doonaa mid sabool caafimaad ahaan ah haddii haraaga biilka isbitaalka uu dhaafo 20% dakhliga sanadlaha ah ee la hagaajiyay ee qoyska, isla markaana uusan awoodin inuu bixiyo gebi ahaan ama qayb ka mid ah haraaga biilka ka dhashay cudur ama dhaawac daran.

- **Qoys**: Laba qof ama in ka badan oo wada deggan isla markaana xidhiidh dhiig, guur ama korsasho ku wada xidhan.
- **Kharashaadka Guud**: Kharashaadka oo dhan heerarkii buuxa ee la dejiyay ka hor inta aan laga jarin wax dhimisyada.
- **Dakhliga Qoyska**: Dakhliga waxaa lagu xisaabiyaa iyadoo la raacayo habraacyada maaliyadeed ee loo isticmaalo go'aaminta u-qalmitaanka ee canshuur-dhimista caymiska caafimaadka, tusaale ahaan, MAGI (dakhliga guud ee qoyska ee la hagaajiyay).
    - Waxaa ku jira mushaharka, lacagta caymiska shaqo la'aanta, caymiska bulshada, gunno ama lacag hawlgab, dulsaarka, faa'iidooyinka saamiyada, kirada, xuquuqda qoraalka (royalties), dakhliga ka yimaada dhaxal, aaminaado iyo ilo kale oo kala duwan
    - Waxaa ku jira faa'iidada ama khasaaraha raasumaalka
    - Haddii qof uu la noolaado qoys/xubin guri oo joogto ah (domestic partner), waxaa lagu daraa dakhliga dhammaan xubnaha qoyska ee xaqa u leh
    - Lama darin waxyaabaha canshuurta laga jaro kahor (pre-tax contributions) sida kharashaadka daryeelka carruurta, safarka shaqada, caymiska caafimaadka ee shaqada lagu bixiyo, koontooyinka kharashka dabacsan (flexible spending accounts), iyo qorshayaasha hawlgabka sida 401K iyo 403b
    - Laguma darin magdhowga shaqada
    - Laguma darin SSI (dakhliga caymiska nabadgelyada dheeraadka ah)
    - Laguma darin dakhliga ka yimaada taageerada ilmaha
    - Laguma darin caawimaadaha lacagta ah (sida Reach Up, Caawimaadda Degdegga ah/Guud
    - Laguma darin caawimaadaha aan lacagta ahayn (sida faa'iidooyinka SNAP iyo gargaarka kirada guryaha)
- **Cabbirka Qoyska**: Bukaan, lammaane, carruur, xubin guri joogto ah, iyo qof kasta oo loo tixgeliyo qof ku tiirsan midkood si waafaqsan canshuurta dakhliga federaalka, dhammaantood waxaa lagu tiriyaa xubnaha isla qoyska. Lamaane guri joogto ah waxaa lagu qeexaa dad aan xiriir sharci guur ah ku jirin balse wada deggan guri, kuna jira xiriir adag oo shakhsiyeed.
    - Waxaa laga reebay shakhsiyaadka is guursaday ee kala deggan inta lagu jiro furriinka, iyada oo aan loo eegin qaabka ay u gudbiyaan canshuurta dakhliga federaalka. Kuwani waa qoysas kala gaar ah.
    - Labada waalid waxay carruurta ku dari karaan heshiiska mas'uuliyadda wadaagga haddii heshiiskaas uu tilmaamo in labada waalid si siman u bixiyaan taageerada dhaqaale.
- **Xaqiijinta Dakhliga**: **Waxaa ka mid noqon kara laakiin kuma koobna oo keliya**:
    - Nuqulka ugu dambeeyay ee canshuur celinta waa kan ugu muhiimsan ee lagu go'aamiyo xaqiijinta dakhliga
    - Haddii aan la helin canshuur celintii federaalka ee ugu dambeysay:
        - Nuqulo laba ka mid ah warqadaha mushaharka ugu dambeeya ama warqadda mushaharka ugu dambeysa ee sanadka
        - Warbixinta dakhliga ee ka socota Xafiiska Amniga Bulshada (800-772-1213)
        - Warqadda faa'iidooyinka Social Security/SSI
        - Qaybsiga penshanka/hawlgabka
        - Warbixinta faa'iido iyo khasaaro dakhli ee shaqo iskeed ah
        - Nuqulka faa'iidooyinka shaqo la'aanta, haddii ay khusayso
        - Dakhliga kirada, haddii hantidu aan lagu darin xisaabinta hantida
        - Qoraal caddeyn ah oo dakhliga ah oo ka yimid loo shaqeeye (haddii lagu bixiyo lacag caddaan ah)
        - Dukumeenti caddeynaya gargaarka dadweyne
        - Heshiis ama caddeyn qoran oo ku saabsan qandaraaska shaqaalaha socdaalka
        - Dukumeenti qoran oo ka socda Xarunta Rugta Caafimaadka Open-Door (Open Door Clinic) oo macluumaad dhaqaale ah siinaya ayaa loo isticmaali doonaa halkii laga heli lahaa xaqiijinta dakhliga kor ku xusan.
- **LEP/Tarjumaad**: Kartida Ingiriisiga oo xadidan waxay u baahan tahay nuqullo la tarjumay oo ah siyaasadaha, foomka codsiga, soo koobka luqad fudud, iyo codsiga.
- **Adeegyada Daryeelka Caafimaad ee Daruuriga ah**: Adeegyada caafimaadka, oo ay ku jiraan baaritaanno ogaansho, adeegyo ka hortag, iyo daryeelka kadib, kuwaas oo ku habboon ogaanshaha ama xaaladda bukaanka marka loo eego nooca, qadarka, soo noqnoqoshada, heerka, goobta, iyo muddada. Daryeel caafimaad oo daruuri ah waa inuu: (A) ku saleysnaadaa caddayn caafimaad ama caddayn saynis oo si guud loo aqbalo isla markaana la jaanqaada xuduudaha dhaqanka ee guud ahaan loo aqoonsan yahay xirfadlayaasha caafimaadka ee ku takhasusay isla goobahaas sida caadiga ah loogu sameeyo daaweynta ama qalliinka; (B) ku saleysnaadaa baahida gaarka ah ee bukaanka iyo xaaladda uu soo bandhigayo; iyo (C) buuxiyaa hal ama in ka badan oo ka mid ah shuruudaha soo socda: (i) ka caawinta soo celinta ama ilaalinta caafimaadka bukaanka; (ii) ka hortagga xaaladda bukaanka inay sii xumaato ama la dejiyo; ama (iii) ka hortagga bilaabashada dhibaato caafimaad oo macquul ah ama lagu ogaado dhibaato soo ifbaxaysa.
- **Dakhliga Guud ee La Hagaajiyay:**: Dakhliga guud ee la hagaajiyay (MAGI) waa dakhliga guud ee la hagaajiyay (AGI) ee qofka ka dib marka la tixgeliyo dhimisyo la oggol yahay iyo ganaaxyada canshuuraha

- **Warqadda Xisaabta Bukaanka:** Waa warbixinta xisaabta bille ah ee bukaanka loo diro cinwaanka gurigiisa kaas oo muujinaya lacagta laga rabo bukaanka si uu uga bixiyo adeegyada daryeelka caafimaadka ee ay bixiso UVMH.
- **Koodhka Macaamilka/Lacag-bixinta:** Waa koodhka macaamilka gaarka ah ee loo adeegsado diiwaangelinta dhimista bukaanka aan caymis lahayn iyo hagaajinta gargaarka maaliyadeed
- **Aan Caymis Lahayn:** Waa bukaanka aan lahayn wax caymis ah ama gargaar dhinac saddexaad oo caawiya bixinta waajibaadkiisa lacag bixinta.
- **Caymis Xadidan:** Waa bukaanka leh caymis heer hoose ama gargaar dhinac saddexaad laakiin weli leh kharashaad jeebka laga bixiyo oo dhaafaya awooddooda maaliyadeed.
- **La-hawlgalayaasha Isbitaalka Vermont ee UVMH:** Waxa ku jira Central Vermont Medical Center, Porter Medical Center, iyo the University of Vermont Medical Center.
- **Deganaanshaha Vermont:** Qof kasta, ha ahaado muwaadin ama aan sharci lahayn, oo ku nool Vermont, kana shaqeeya shirkad ku taal Vermont si uu u bixiyo adeegyo, ama wax ka barta dugsiyada Vermont, ama isku-darka arrimahan, ayaa loo tixgeliyaa inuu deggan yahay Vermont. Erayga waxa kujiraa qof ku nool Vermont xilliga adeegyada la bixiyo balse aan haysan guri joogto ah oo deggan

**SIYAASADAHA LA XIRIIRA:**

| | |
|---|---|
| PAS35 | Xaddidaadda Kharashaadka (AGB) |
| EXEC11 | Codsiyada Bixinta Adeegyada Daryeelka Caafimaadka ee Bukaannada Ajaanibta ah |
| RISK4 | Baaritaanka Caafimaadka iyo Xasillinta |
| UVMH_CUST1 | Amaahda iyo Ururinta |

**TIXRAACYADA:**
IRC § 501(r)(4):
IRC § 501(r)(5):
IRC § 501(r)(6):
26 C.F.R. §1.36B-2
26 C.F.R .§ 1.501(r)-5(b)(3)
18 V.S.A. § 9481(5)
H.287 (Xeerka 119)
Cinwaanka 18 ee Vermont, Cutubka 221, Hoos-Qaybta 10:
VT Admin. Code 12-3-213:4373
§ 9481 Qeexitaanno
§ 9482 Siyaasadaha gargaar dhaqaale ee xarumaha caafimaadka waaweyn
§ 9483 Hirgelinta siyaasadda gargaar dhaqaale
§ 9484 Wacyigelinta dadweynaha iyo macluumaadka
§ 9485 Mamnuucidda iibinta deynta caafimaadka
§ 9486 Mamnuucidda ka tanaasulka xuquuqda
§ 9487 Dhaqan-gelinta

**Dib-u-eegayaal:**

Scott Comeau, CFO PMC/ECH
Kimberly Patnaude, CFO CVMC
Judy Peek-Lee, CFO UVMMC
Craig Chase, Madaxa Fulinta UVMH System ee Dakhliga
Melissa Laurie, Madaxa Fulinta UVMH System ee Xisaabiyaha Guud
Laura McNamara, Ku-xigeenka Madaxa UVMH System Sarkaalka UMPH/Asturnaanta
Gina Slobodzian, Agaasimaha Adeegga Macaamiisha UVMH
Chris Cook, Agaasimaha Adeegyada Maaliyadda Bukaannada, PMC

**MILKIILE:** Shannon Lonergan, AVP ee Helitaanka Bukaanka
**U ANSIXIN SI RASMI AH:** Rick Vincent, UVMH Madaxweyne Ku Xigeenka Fulinta Maaliyadda iyo CFO